

XISBIGA XAQ IYO CADDAALO

(XAQ-CAD)



01/19/1441

09/18/2019

HADAFKA UGU WEYN EE XISBIGAN LOO AASAASAY WAXA UU YAHAY SIDII LAGU HELI LAHAA XISBI LOO WADA DHAN YAHAY OO LA WADA LEE YAHAY OO AYSAN CIDINA GAAR U LAHAYN, KAAS OO LA DAGAALAMA DHAMAAN ARIMAHA SOOMAALIYA DIB U DHIGAY SIDA, QABYAALADDA, MUSUQ-MAASUQA, EEXDA, LAALUUSHKA, DHACA, CADAALAD DARADA IYO AWOOD QAYBIGA BEENTA AH EE QABIILKA KU DHISAN. WAXAA KALE UJEEDOOYINKA XISBIGA LOO ASAASAY KA MID AH, IN LA HELO XISBI AAN KU KOOBNAAN HAL MAGAALO OO QURAH. XISBIGANI WUXUU NOQON DOONAA XISBI LAGA FURO DHAMAAN MAGAALOOYINKA SOOMAALIYA.

Waxaa qoray: Muuse Siciid Aw-Muuse

Hubiyey: Muuse Cali Jaamac
Maxamuud Maxamed Ciise
Mukhtaar Cali Khaalid

XEERKA 1AAD (Q1-Q6)

FIKIRKA XISBIGA:

Xisbigan Xaq-Cad wuxuu aaminsan yahay oo dhidibo adag u ah 5ta aragtiyood ee hoos ku qoran:

1. Wuxuu xisbugu aaminsan yahay in loollan siyaasadeed lagu qaado cid kasta oo u damac uga jiro boobka hantida umadda, siyaasadana u aragta meel hanti laga kasbado.
2. Waxa kale oo xisbigu aaminsan yahay in diinta islaamku tahay dastuurka kaliya ee qofka muslimka ah yeelan karo, sidaas aawadeedna ay tahay in laga dhigto loona arko ku dhaqankeeda dastuur.
3. Wuxuu xisbugu aaminsan yahay in siyaasadu tahay run, caddaalad, daacadnimo iyo aqoon
4. Wuxuu kaloo xisbugu aaminsan yahay in qaabka doorashooyinku u dhacaan uu noqdo xulasho qofka xilka loo soo xulo, ka dibna codbixin

ahaan loogu doorto, mana aha wax haboon in qofku is sharaxo.

5. Wuxuu xisbugu aaminsan yahay in marka shantaas aragtiyood la hirgeliyo, oo umadda laga dhiso loo gudbi karo horumarka nolosha ee maadiyaadka ah.

Arar ku saabsan aragtida dhow ee xisbiga iyo midda fog

Xisbigani wuxuu qabaa in dadka maanta sheegta inay yihiin siyaasiin soomaaliyeed ay dhammaantood yihiin dad danaysato ah oo aan wax horumar usoo wadin umadda soomaaliyeed, kuwaas oo kuraasta ay ku fadhiyaan iibsaday, Shacabka soomaaliyeedna arintaas daraadeed yahay, kuwo aan lahayn sharciyad ama awood ay kula xisaabtami karaan siyaasiyiintaas, waayo waxa ay haystaan waa wax ay iibsadeen oo ah hanti ay lee yihiin. Sidaan wada ognahay waxaan sanad walba ka markhaanti kacnaa, dalkeena hogaangiisa ugu sareeya oo laaluush lagu kala gadanayo, waxaan goob-

4MMMM+A

joog u nahay xildhibaano ku sheeg lacag aad u fara-badan ku iibsanaya sharafteena iyo cisigeena. Waxaan u wada jeednay sanadkii 2017kii qiimaha lagu kala gatay kuraasta la inagu matalo, waxaan indhaheena ku aragnay qiimaha uu gaaray kursiga ugu sareeya hogaanka dalka, waxaan aragnay sida dawladdo shisheeye oo dano gaar ah lihi u baayacayeen sharafteena iyo soomaalini-madeena, uguna guuleeysteen, ilaa haddana ay gacanta inagula jiraan oo dhexdeena ka dhigeen midba ku dir kan kale. Waxaan goob-joog u ahayn sanadakan 2019 sidii loo kala gatay kuraasta xildhibaano ku sheega ina matala, iyo qiimihii uu gaaray kursiga ugu sareeya madaxnimada.

Haddaba maanta waxaa la joogo wakhtigii laga tashan lahaa dadka sharafteena ka dhigtay wax la kala iibsado oo sidii la doono loogu tagri-falo, waxaa maanta ceeb inagu ah in shalay kuwii xilka ka dagay oo hogaanka ku fashilmay ay maanta samaysteen xisbiyo been ah oo ay iyagu lee yihiin, oo doonayaan inay mar kale ina soo hor fariistaan oo ina matalaan.. Waxaa haddaba muuqda ololihii

4MMMM+A

doorashada oo dhamaan dadkii danaysatada ahaa u suxul-duubayaan, berina haddii aynaan baraarugin oo iska dhicin, halkii ka wadayaan hagardaamadii. Waxaad ogaataa in dawladnimadu tahay shacabka oo iska soo xula dad hufan oo iyaga matala, dawladnimadu ma aha dad iyagu isa soo sharaxa oo iskood xil u raadiya, kadibna iibsada oo lacag xad dhaaf ah ku bixiya. Waxaa iyana cad oo aan wada ognahay dadka mucaaradaya dawladdaha hadda jira inay dhammaantood yihiin dad horay u ahaa siyaasiyiin fashilmay oo haysata hantidii ay umadda ka dhaceen, haddana doonaya in dib kuraastii ugu soo laabtaan oo halkii ka sii wadaan dhacii iyo boobkii iyo beentii ay inoo sheegayeen.

Haddaba maanta waxaa loo baahan yahay in aan xal helo oo aynaan daawan, xalku wuxuu yahay inaan kacno oo is abaabulno oo ku dadaalno inaan raadino dad loo tababaray aragti siyaasadeed oo ka duwan dhamaan wixii horay u jiray burburka iyo ka horba. Aragtidaas oo ku dhisan sharafta iyo qiyamka ay leedahay diinteenu. Maanta shacabka

4MMMM+A

soomaaliyeed waxay diyaar u yihiin inay helaan isbadal dhab ah, hase ahaatee waxaa ka hortaagaan dariiqa horumarka hogaan-xumo ragaadisay oo lug-gooysay hankii shacabka soomaaliyeed. Sidaas aawadeed waxaa muhiim ah in loo gudbo nidaam midayn kara dadka isku aragtida ka ah arimahan, nidaamkaas oo noqon kara xisbi la wada lee yahay oo aan si wadajir ah u wadarayno awoodaheena oo uga hortagno danaysata dadkeena iyo dalkeena maanta meeshaan aan u wada jeedno dhigay, mustaqbalkii dhalinteena iyo dhalaankeenana galiyey mugdi madow oo iftiinkii u baxaaba uu damo. Haddii aan kali-kali u taagnaano waxba ma tari karno, aan ka ahayn inaan calaacalno. Midnimo iyo fikirkeena oo aan badalno ayaan kaga guuleysan karnaa danaysatada kuraas doonka ah. Waa in aan helno Xisbi leh shuruuc, kala damayn iyo siyaasad hufan oo ay sal u tahay cadaalad, run, iyo daacadnimo.

Haddaan nahay asaasayaashii Xisbigan Cadaaladda kuma lihin waxaan jeexaynaa webiyaal malab ah, laakiin waxaan ku lee

4MMMM+A

nahay waxaan wada horseedaynaa dariiqii looga bixi lahaa, amni-darada, qabyaaladda, musuqmaasuqa, laaluushka, eexda, iyo kala qoqobka xuduudaha beenta ah. Waxaa hadafkayagu yahay in kan ku dhashay Muqdisha uu ka shaqaysan karo kuna noolaan karo Caluula, kan Gaalkacyo ku noolna dagi karo oo si nabad ah uga shaqaysan karo Kismaayo. Waxaa la yaab leh in fikirkan qofka kasta oo soomaali ah uu qabo, haddana uu diyaar u yahay in sidaasi hirgasho, haddana aan lahayn ciddii gaarsiin lahayd, waxaa moodaa in siyaasiyiinta soomaaliyeed ay iyagu maanta yihiin kuwa inaga hortaagan in fikirkani hirgala.

Taas ayaana sababtay in xisbigan shuruucda u dajisani ay ka mamnuucayso dhamaan dadka siyaasada horay uga soo shaqeeyey iyo kuwa dawladda ku jiraaba ay ka noqdaan xubin xisbigan. Ujeedkayagu wuxuu yahay in la helo dad hufan, wanaagsan, leh diin iyo aragti sax ah. Dadka aan xisbigan u rabnaa waa dadka iyagu xishoonaya oo aan jeclayn in ay galaan siyaasada.

4MMMM+A

Maanta waxaa ina hortaal Puntland dhexdeeda fursad aad qaali u ah oo aan tijaabo ka qaadi karno codkeenu wuxuu noo gooyo. Waxaa dhawaan bilaami doonta doorashooyin degmooyinka qaar laga hirgeliyo oo nin iyo cod ah. Waxaa marka ujeedkayagu yahay in aan dadkii ku guuleysan lahaa doorashooyinkaas ka dhigno dad hufan oo tababaran, leh fikir siyaasadeed oo xeel dheer, leh qiyam sare oo diini ah, dadkaas oo noqda dad xubno ka ah Xisbiga Xaqqa iyo Cadaaladda. Waxaa hadafkayagu yahay in magaalo kasta oo doorashadaas tijaabada ah ka dhacdo aan ku yeelano xafiis, kadibna ugu yaraan sadex meelood oo laba meelood Golaha deegaanka ee la doortaa u noqdaan xubno ka mid ah Xisbiga Xaqqa iyo Cadaaladda, kadibna aan ku soo baxno Gudoomiyaha degmada.

Waxaa kale oo yoolkeena ugu weyni yahay in doorashada Federaalka ee dhici doonta 2021 bisha Febaraayo aan ugu yaraan xildhibaanada Federaalka ku yeelano 95 xildhimaan, si markaas qof hufan oo ka mid ah

XIZBIGA XAQ IYO CADAALO
RIGHT AND JUSTICE PARTY

xisbigan uu u noqdo hogaanka dalka ugu sareeya.

Xisbi ahaan waxaan aaminsanahay Soomaaliya oo mid ah, waxaana qorshahayagu yahay in xisbigan laga furo magaalo kasta oo soomaali dagto, waxaa furaya dadka magaaladaas dagan, magaalo kastana iskeed ayeey u madax banaan tahay, kaliya waxaa naga dhexeeya xeerarka iyo nidaamka hoos ku qoran iyo hal aragti oo aan ka wada midaysanahay. Waxaan wada og nahay maanta dhamaan xisbiyada dalka ka furan waa kuwo ay samaysteen oo ah hanti ay lee yihiin shakhsiyaad sheeganaya siyaasiyiin, iyagaana madax ka ah, iyagaa leh, iyagaa maal-gashada, waana nidaam aan caalamka meelna ka jirin. Xisbiyadu waxay lee yihiin nidaam iyo shuruuc aan loo kala sokayn cidda hogaanka qabanaysa. Haddaba maanta ka mid noqon xisbigan aan laga lahayn meel kasta oo aad joogto la xiriir xafiiska deegaanka, ku biir, kana shaqay danaha deegaankaaga, waxaase kaliya oo inoo balan ah midnimo iyo ku wada shaqayn hal mabda'a oo qurah.

4MMMM+A

Hoos ka bogo oo akhriso nidaamka iyo xeer-hoosaadka xisbiga. Wax kasta waxaan u samaynay xeerar iyo nidaam. Waxaan aad uga fakarnay waxyaalaha sababay in siyaasiyiinta soomaaliyeed isku dhacaan oo is khilaafaan mar kasta. Sidaas aawadeed waxaan xisbigaan u dajinay sistam ama nidaam aan marna isku dhac keenayn. Fadlan akhri tusaale ahaan xeerka 5aad iyo xeerka 7aad. Waxaa lagu asteeyey oo nidaam cad loo sameeyey qaabka wax loo dooranayo iyo shaqooyinka guddiyada iyo guddoomiyeyaasha xisbiga. Waxaan oran karnaa ma jiro xisbi leh nidaamkan oo kale.

Mahad Allaah baa leh!

XEERKA 2AAD (Q1-Q5)

DHAQAN GELIDDA XEERARKA XISBIGA:

Xeerka habraaca xeer hoosaadyada iyo dhaqan-gelintooda guud ahaan, iyo sida ay gaar ahaan xubnaha xagooda ugu dhaqan galayaan.

1. Xeerarka xisbigu waxay dhaqan galayaan marka shir weynaha xisbiga dhexdiisa ah loo codeeyo oo si aqlabiyad ah oo hal dheeri ah loo ansaxiyo.
2. Dhamaan xeerarka khuseeya xubin, waxa ay dhaqan galayaan marka xubinta ay khusayso si gaar ah looga saxiixo.
3. Waxaa jiri doona xeer hoosaadyo gaar ah oo ay guddiyada kala gaarka ahi soo saari karaan, kuwaas oo iyana dhaqan galaya marka guddiga sare uu shir weyne si aqlabiyad ah oo hal dheeri ah ugu ansaxiyo.
4. Dhamaan xubnaha xisbigu waa in ay bartaan xeerarka xisbiga, waxaana

4MMMM+A

waajib ka saaran yahay ku dhaqankooda.

5. Xubintii ku dhaqmi weyda xeerarka xisbiga oo barbar marta, waa laga saarayaa xisbiga, iyadoo la raacayo hab-raaca ka ka saaridda xisbiga xubin denbi gashay.

XEERKA 3AAD (Q1, (A,B,C,D),-6, (7a,b,c,d,e), 8-10)

DARAJOOYINKA AMA NOOCYADA XUBINNIMADA XISBIGA:

Ujeedada iyo haddafka xeerka 3aad laga lee yahay

Ujeedka laga lee yahay in xubnaha xisbiga la kala saaro oo ay yeeshaan afar darajo oo kala duwan waxa ay tahay:

1. in xubnaha firfircoon iyo kuwa aan firfircoonayn aysan isku xuquuq noqon.

2. in talada iyo hogaanka xisbiga ay yeeshaan xubnaha firfircoon ee si joogto ah u bixiya lacagta xubinimada. (eeg Qodobka 7aad).

HAYGA XAQ IYO CADAALADA PARTY

1. Xubnaha xisbigu waxay u kala bixi doonaan afar darajo oo kala ah:
   A. Xubin buuxda
   B. Xubin caadi ah
   C. Taageere buuxa
   D. Taageere

2. *Darajo kasta oo ka mid ah xubinnimada xisbiga waxay lee deehay shuruudo gaar ah oo ay xisbiga kaga mid noqon karto, waxay kaloo lee dahay xuquuqo iyo waajibaado u gaar ah.*
3. *Waxay lee yihiin xeer hoosaado qeexaya mudada ay darajada xubinnimo ku qaadan karaan, waxaana la dhahaa xeer hoosaadkaas* ***"Xeer hoosaadka shuruudaha xubin lagu noqdo iyo darajooyinkooda sida lagu kala saarayo". FG:eeg X6aad.***
4. *Waxaa kala saari doona oo darajada xubinnimada siin doona Guddiga sare ee xisbiga, waxayna mari doonaan maraaxil gaar ah oo lagu kala saaro iyaga oo raacaya sida xeer hoosaadku farayo.*

5. *Xubnaha oo dhami ma noqon doonaan xubno buuxo. Si qofku u noqdo xubin buuxda waa in uu shaqaysto oo kartideeda, firfircoonideeda iyo kalsoonideeda la yimaado.*
6. *Xubnaha xisbigu waxay qaadan doonaan kaarar aqoonsi ah oo ay ku caddahay darajada xubinnimadooda.*
7. *Ujeedka laga lee yahay in xubnaha xisbiga loo kala saaro afar darajo oo kala duwani waxay tahay:*
    a. *In xisbiga aysan afduubin dadka siyaasada u haysta meel mansab degdeg lagu gaaro oo hanti laga dhaqda*
    b. *In xisbiga laga ilaaliyo dad horay usoo fashilamay inay markaba taladiisa la wareegaan, hadhowna laga furfuri waayo.*
    c. *In la dhowro sumcadda xisbiga.*
    d. *In darajada u saraysa ee xisbiga ee ah xubinta buuxda ay noqoto wax dadaal iyo hawlkarnimo lagu gaaro, ee*

aanay iskaga qor xubin buuxda noqon.

e. *In dadka fikirka xisbigu ka dhab yahay ee daacadda ah laga sooco kuwo cagajiidka ah ee uusan ka dhabta ahayn, si aysan ula dagin.*

8. Dadka xubnaha ka ah ama ka tirsan **<u>Ururada bulshada, dhalinyarada, ama diinta</u>** waxay xisbiga ku lee yihiin maqaam gaar ah, waxayna lee yihiin nidaam ay uga qayb qaadan karaan xisbiga. Arintaas waxay kala fariisanayaan Gudiga Dhexe ee xisbiga.

9. Waa ay soo buuxin karaan arjigi xisbiga oo soo cosdan karaan si gaar-gaar ah, hase ahaatee waa inay kusoo xusaan ururka ay ka tirsan yihiin, markaas ka dib ayaa Gudiga Dhexe ee xisbigu si gaar ah ula shirayaa oo xubinimadood oo qaab urur rayid ahaana loogala shirayaa.

10. *Shirarka xisbiga iyo doorashooyinku waxay lee yihiin hanaan iyo xeer hoosaado u gaar ah kuwaas oo lagu kala qeexi doono*

4MMMM+A

xubnaha haysta darajo ay kaga qayb-geli karaan shirka markaas socda, waxaana la dhahaa ***"Xeer hoosaadka shirarka iyo doorashooyinka xisbiga iyo xubnuhu sida ay uga qayb qaadan karaan". FG:eeg X10aad.***

XEERKA 4AAD (A1-6), (B7-10), (C11-15), (D16-21)

SHURUUDAHA LAGU NOQON KARO XUBIN XISBIGA KA MID AH:

Xisbigan Xaq-Cadwaxaa xubin buuxda ka noqon kara cid kasta oo buuxisa shuruudaha hoos ku qoran:

A. XUBIN BUUXDA

1. Soomaali, qaan-gaar yahay, muslim yahay, aaminsan yahay in diintu tahay xalka kaliya ee waa- raya, lee yahay akhlaaq iyo dhaqan hufan, aaminsan yahay qiyamka diinta.

4MMMM+A

2. Inuusan siyaasad horey usoo gelin, wax xil ah dawlad ka hayn, horayna uga soo qaban, kana tirsanayn urur siyaasadeed, wax denbi ahna lagu soo eedayn, lee yahay aqoon diimeed oo ku filan.
3. Dadka aan xisbiga xubin buuxda ka noqon karini waxay noqonayaan; Xubin caadi ah, Taageere buuxa iyo Taageere.
4. Waa in xubinta buuxda ay bixiso lacagta xubinimada isla marka la diiwaan geliyo oo loo aqoonsado xubin buuxda.
5. Waa in qofka xubinta buuxda noqonayaa uu aqbalo inuusan xil isu sharaxi karin. Waxaa jira xeer hoosaad gaar ah oo arintan sharaxaya. Waa in uu yahay qof saxiixay xeer hoosaadkaas oo oggol waxa ku qoran. Hadii uu ka baxana, waxaa laga saarayaa xisbiga bilaa shuruud.
6. Xubinta buuxda ee xisbigu waxay lee dahay faa'idooyin, xuquuqo gaar ah

4MMMM+A

iyo waajibaadyo gaar ah oo aan xubnaha kale lahayn, kuwaas oo ku qeexan xeer hoosaad u gaar ah oo la dhaho ***"Xeer hoosaadka faa'idooyinka, xuquuqaha iyo waajibaadyada gaarka ah ee xubinta buuxda". FG: eeg X9aad.***

B. XUBIN CAADI AH

Xisbigan Al-Caddaala waxaa xubin (xubin caadi ah) ka noqon kara cid kasta oo buuxisa shuruudaha hoos ku qoran:

7. Soomaali, qaan-gaar yahay, muslim yahay, aaminsan yahay in diintu tahay xalka kaliya ee waa- raya, lee yahay akhlaaq iyo dhaqan hufan, aaminsan yahay qiyamka diinta,
8. Inuusan siyaasad horey usoo gelin, wax xil ah dawlad ka hayn, horayna uga soo qaban, kana tirsanayn urur siyaasadeed, wax denbi ahna lagu soo eedayn, lee yahay aqoon diimeed oo ku filan.

XIZBIGA XAQIIJU CADAALO
XAQ CAD
RIGHT AND JUSTICE PARTY

9. Waa inay xubinta caadiga ah ay bixiso lacagta xubinimada isla marka la diiwaan geliyo, oo loo aqoonsado xubin caadi ah.
10. Qofka xubinta xisbiga ah isuma sharaxi karo xil, loomana xuli karo xil inuu qabto, wuxuu ka qayb gali karaa shirarka xisbiga ee caamka ah. Qofka xubinta ah wuxuu lee yahay xeer hoosaadyo gaar ah oo qeexaya waajibaadka iyo xuquuqaha xubinimadiisa.

C. TAAGEERE BUUXA

Taageere buuxa oo xisbigan ah waxaa noqon kara dadka buuxiya shuuudaha hoos ku qoran:

11. Inuu yahay soomaali, qaan-gaar, Muslim ah.
12. Wuxuu ahaan karaa qof dawladda horay ugu shaqeeyey oo masuuliyad soo qabtay.
13. Lagama rabo, waajibna kuma aha lacagta xubinnimada xisbiga.

XISBIGA XAQ IYO CADAALO
RIGHT AND JUSTICE PARTY

4MMMM+A

14. Kama qayb gali karo shirarka gaarka ah ee xisbiga. Wuxuu imaan karaa shirarka wacyi gelinta xisbiga, iyo dhamaan wixii munaasabado ah ee dadweynaha loo qabanayo. Hase ahaatee waxaa jirta in Guddiga maamulku ay u ogolaan karaan shirarka qaarkood, markay iska arkaan oo ka doodaan.
15. Waxaa qeexi doona xeer hoosaadyo gaar ah qofka loo qaadanayo inuu noqdo taageere buuxa.

D. TAAGEERE

Xisbiga waxaa taageere u noqon kara dadka buuxiya Shuruudaha hoos ku qoran:

16. Qof kasta oo dadweynaha ka mid ah.
17. Lagama rabo, waajibna kuma aha lacagta xubinnimada xisbiga.
18. Kama qayb gali karo shirarka gaarka ah ee xisbiga. Wuxuu imaan karaa shirarka wacyi gelinta xisbiga, iyo

4MMMM+A

dhamaan wixii munaasabado ah ee dadweynaha loo qabanayo.

19. Wuxuu qaadan karaa astaamaha iyo calanka xisbiga, wuxuu u olalayn karaa oo faafin karaa afkaaraha xisbiga, hase ahaatee wax go'aan iyo qaraar ah kuma laha arimaha xisbiga.

20. Looma xuli karo hawlo masuuliyadeed ee xisbiga ah, mana aha xubin, wuxuu ku eg yahay un taageere.

21. Waxaa qeexi doona xeer hoosaad gaar ah mudada uu ahaan karo taageere iyo sida uu ku gaari karo darajooyinka xubinimada xisbiga ee kala ah taageere buuxa, xubin caadi ah iyo xubin buuxda.

4MMMM+A

XEERKA 5AAD (Q1-Q5), (Q6A-I)

GUDDIYADA XISBIGA, SOO XULISTOODA IYO SHAQADOODA:

Ujeedada iyo haddafka xeerka 5aad

Xisbigan waa xisbi la wada leeyahay oo aan loo kala sokayn, cid xuquuq gaar ah gooni u lihina ma jirto. Sidaas aawadeed talada xisbigu waa mid ku dhasan wada tashi (shuuro) ay hanaanka u hayaan guddiyo ka kooban 9 guddi oo leh gole shuuro oo ka kooban 70 xubnood. Dhamaan dadka xubnaha buuxa xisbiga ka ahi waxay xaq u leeyihiin in la soo xulo, iyana ay cid soo xuli karaan. Cid is sharaxi karta ama qaab murashax isu xayeesiin karta lama oggolo.
Mabaa'diida xisbiga waxaa ka mid ah in qofka xil loo dhiibayo la soo xulo ee aan lagu dooran qaab uu isa soo sharaxay oo dadka hor boodo.

Xulista guddiyada xisbiga iyo tiradooda(2aad-5aad)

1. Guddiyada xisbiga waa in loo soo xulo qaab waafaqsan diinta islaamka, waana in shaqadoodu noqoto qaab talo wadaag ah.

2. Xisbigu wuxuu lee yahay hogaamin iyo guddiyo fulin oo shaqada qaabilsan, kuwaas oo la xuli doono marka ugu badnaan mudo 3 bilood ah laga joogo ku dhawaaqista xisbiga.

3. Xisbigu wuxuu u shaqeeyaa qaab heer dagmo ilaa heer maamul-goboleed ilaa iyo heer federal oo dhammaantood kala madax banaan, haddana kuwada shaqeeya hal hadaf iyo hal qaanuun oo isku mid ah. Waxayna lee yihiin xeerer iyo nidaam isku mid ah. Kaliya wuxuu yahay farqiga u dhexeeyaa in deegaan kasta dadka daggani ay yihiin kuwa iyagu talada xisbiga haya.

4. Degma kasta oo xisbiga laga asaasaa waxay yeelan doonta xafiis degmada u gaar ah iyo guddiyo u gaar ah oo heer

4MMMM+A

degmo ah. Guddiyadaas oo ka kooban 9, waxaa mid kasta ku jira 7 xubnood, marka laga reebo guddiga maamulka oo ah 9. Waxaa degmo kasta markaas hawlaha xisbiga u xil saaran Gole ka kooban 70 xubnood oo leh 9 guddi oo hawl fulin. Xubnaha guddiyada ka mid noqonayaa waa 57 xubnood, waxaana kayd u noqonaya 13 xubnood.

Shaqada guddiyada xisbiga iyo hanaankooda

5. Guddi kasta waxaa jira xeer hoosaadyo shaqadooda qeexaya, waxay yeelan doonaan waajibaadyo saaran iyo xuquuqo ay lee yihiin, waxaana dhamaan hawlaha guddiyada qaybahooda kala duwan xeer dajin iyo nadaam u samayn doona Guddiga maamulka iyo Guddiga xeer-dajinta.
6. Guddiyadu waxay noqon doonaan sida soo socota
    A. Guddiga sare ee maamulka (9 xubnood)

XISBIGA XAQ IYO CADAALADA
XAQ CAD
RIGHT AND JUSTICE PARTY

B. Guddiga dhaqaalaha (7 xubnood)
C. Guddiga isla-xisaabtanka iyo odhoda (7 xubnood)
D. Guddiga dhalinyarada iyo ururada bulshada (7 xubnood)
E. Guddiga wacyi-gelinta (7 xubnood)
F. Guddiga shuruucda iyo xeer-dejinta (7 xubnood)
G. Guddiga horumarinta (7 xubnood)
H. Guddiga warbaahinta iyo saxaafadda (7 xubnood)
I. Guddiga arimaha dibadda iyo xiriirka caalamiga ah (7 xubnood)

XISBIGA XAQ IYO CADAALO
XAQ CAD
RIGHT AND JUSTICE PARTY

XEERKA 6AAD (Q1-Q3)

DIIWAAN GELINTA XUBNAHA XISBIGA IYO CIDDA KU SHAQADA LEH:

1. Diiwaan gelintu waxay u dhacaysaa qaab qoraal ah oo dadka xubnaha noqonayaa waxay buuxinayaan foomam, waxay bixinayaa lacagta xubinimada, waxay qaadanayaan aqoonsiga xisbiga ugu badnaan 3 bilood ka dib marka ay xisbiga ka yihiin xubno agtif ah oo bixiya lacagta xubinimada.

2. Waxaa dhamaan diiwaangelinta xubnaha xisbiga si wada jir ah u qabanaya, guddiyada dhalinyarada iyo wacyi-gelinta. Labadaas guddi ayaa u xil saaran.

3. Xubnaha xisbiga marka ay soo buuxiyaan arjiga xubinimada ayaa waxaa codsigooda eegaya gudi farsamo oo ku shaqo leh, kaas oo

XEERKA 7AAD (Q1-Q78)

SHAQADA GUDOOMIYAHA, KUXIGEENKA IYO GUDDIYADA:

Ujeedada iyo haddafka xeerka 7aad

Gudoomiyaha, kuxigeenka iyo guddiyadu dhamaantood waxay lee yihiin shaqooyin cad oo leh ujeedooyin iyo hanaan u gaar ah. Cid kasta waxay qabanaysaa shaqooyin loo asteeyey, waxay raacaayaan nidaamyo iyo xeer hoosaadyo ay ku shaqeeyaan. Kuma dhaqmi doonaan wax ay jeebkooda kala soo baxeen, ee waxay raacayaan ajandayaal iyo yoolal loo dajiyey. Shirarku waxay yeelan doonaan nidaamyo iyo hanaan la raaco. Fulinta shaqadu waxay lee dahay nidaamyo iyo xeer hoosaadyo u gaar ah. Wax kasta waxaa laga raacayaa qoraallo qoran oo xisbigu lee yahay.

SHAQADA GUDOOMIYAHA

XISBIGA XAQ IYO CADAALO
XAQ CAD
RIGHT AND JUSTICE PARTY

4MMMM+A

1. Waa shir gudoomiye raacaya ajandaha shirka waxa ku qoran, wuxuu ku shaqaynayaa ajande hore loo soo diyaariyey.
2. Doorashooyinka wuxuu la cod yahay xubnaha kale, waxbana ma dheera.
3. Wuxuu qaab shuuro ah u daadahaynayaa hawlaha hogaanka xisbiga.
4. Ma laha awood uu go'aamo jeebkiisa kala soo baxo, kaliya wuxuu fulinayaa wixii la isku waafaqo.
5. Wuxuu dhagaysanayaa aragtiyaha, dacwadaha, dhaliilaha iyo talooyinka xubnaha iyo cid kasta oo xisbiga xataa ka baxsani waxay usoo jeediyeen. Ka dibna wuxuu la wadaagayaa Golaha xisbiga oo fadhigiisu dhamaystiran yahay.
6. Awood uma laha oo lama hadli karo warbaahinta, hadii uusan fasax ka haysan Gudoomiyaha guddiga warbaahinta iyo saxaafada. Iyaga ayuu kala tashanayaa waxa uu doonayo inuu ka hadlo, ka dib markay ku waafaqaan ayuu hadli karaa.

7. Shaqadiisa ugu weyni waxa ay tahay inuu ka shaqeeyo oo goor walba ka fakaro sidii himilooyinka xisbiga lagu gaari laahaa.
8. Waa isku xiraha u kala dab-qaada xafiiska degmada ee xisbiga iyo xafiisyada kale ee degmooyinka kale ku yaal.
9. Wuxuu gaar gaar shirar ula yeelan karaa gudoomiyeyaasha guddiyada oo tiradoodu tahay 8 gudoomiye.

XIL KA QAADISTA GUDOOMIYAHA

10. Gudoomiyaha waxaa xilka ka qaadi kara tiro ka badan 3/2+1 (sadex meelood oo laba meelood+1) 47 xubnood.
11. Waxaa gudoomiyaha dacwad ka keeni kara 3/1 oo u dhiganta 23 xubnood.
12. Waxay codsiga dacwadda u gudbinayaa isla isaga, haddii maalinta uu helo dacwadda maalinta ku sadex ah uu isugu yeeri waayo golaha 70ka xubnood ah, waxaa isugu yeeraya golaha

gudoomiye kuxigeenka, isaga ayaana shirka hogaaminaya.

13. Hadii ay dhacdo in labaduba isugu yeeri waayaan golaha, waxaa isugu yeeraya Gudoomiyaha Guddiga shuruucda iyo xeer dajinta, kaas oo marka horeba loo gudbin doono galka dacwadda, ka dib marka uu eego ka codsan doona, in gudoomiyuhu isugu yeero golaha oo dhan.
14. U yeeritaanka goluhu waa in uu noqdo qoraal loogu gudbinayo warbaahinta gudaha ee golaha.
15. Hadii gudoomiyaha ama kuxigeenka ama cid kasta oo xubnaha sare ee Golaha ka mid ah lagu arko inay ku jiraan hawlo ay ugu olalaynayaan inay xil ku doontaa, waxaa laga casilayaa xilka, waxaana u shardi ah in arintaas ay ku cadeeyaan laba markhaanti oo golaha ka tirsan, kuwaas oo la dhaarin doono.
16. Hadii Gudoomiyaha ama kuxigeenku ay shaqadooda gudan waayaan oo guddiga isla- xisaabtanka iyo odhodu uu dacwad ka soo gudbiyo, waxaa

4MMMM+A

xilka qaab codayn ah uga qaadaya golaha.

SHAQADA GUDOOMIYE KUXIGEENKA

17. Waa la taliyaha kowaad ee gudoomiyaha, waa ku simaha gudoomiyaha mar kasta oo gudoomiyuhu maqan yahay isaga booskiisa si buuxda ugu jira, xataa hadii uu magaalada joogo oo imaan waayo shirarka, waxaa shaqadiisa toos ula wareegaya kuxigeenka, waana la awood noqonayaa.
18. Wuxuu gudoomiyuhu u wakiilan karaa shaqooyinka qaarkood, waana in uu aqbalo oo u qabto shaqooyinkaas sida gudoomiyaha.
19. Marka gudoomiyuhu goob-joog yahay malaha wax awood ah oo gaar ah, wuxuu la mid yahay xubnaha kale ee xisbiga.
20. Kuxigeenka qofka noqonayaa waa inuu yahay qof gudoomiye u ah guddiyada xisbiga.
21. Wuxuu noqonayaa gudoomiyaha xisbiga ee kumeel gaarka ah, hadii

XISBIGA XAQ IYO CADAALO
XAQ CAD
RIGHT AND JUSTICE PARTY

gudoomiyaha xil ka qaadis lagu sameeyo, hase ahaatee ma ahaan karo gudoomiye mudo ka badan sadex maalmood, waayo marka gudoomiyaha xilka laga qaado waa in isla markaba gudoomiye la doortaa, hadii aysan jirin duruufo gaar ah oo arinta xulidda gudoomiyaha dib u dhigi kara.

SHAQO KA QAADISTA GUDOOMIYE KUXIGEENKA

22. Waxay la mid tahay xeerasha gudoomiyaha shaqada looga qaadayo.

SHAQADA GUDDIYADA FULINTA

A. <u>Guddiga Maamulka</u>

23. Waa guddiga xisbiga ugu sareeya waxaa gudoomiye u ah gudoomiyaha guud ee xisbiga. Waxay ka kooban yihiin 9 xubnood, oo ka imaanayaa gudoomiyayaasha guddiyada fulinta ee sideeda ah, oo lagu daray Gudoomiyaha

4MMMM+A

24. Guddiga maamulka waxaa fadhigoodu ku ansaxayaa Gudoomiyaha iyo 5 xubnood oo guddiga ka mid ah hadii ay goob joog yihiin.
25. Shaqadoodu waa fulinta siyaasada xisbiga, wixii talo ah ama go'aan ah waxay horgeeynayaan Golaha 70ka ah, halakaas ayaa cod loogu ansixinayaan.
26. Ma fulin karaan talo aan goluhu gaarin oo la soo marin.
27. Sida gudoomiyaha oo kale waxay ku shaqaynayaan ajande qoran oo la ansixiyey, jeebkooda kalama soo bixi karaan go'aamo aan loo ansaxin. Taladooduna waa shuuro.
28. Waxay shaqadooda ugu weyni tahay inay fuliyaan siyaasadaha guddigani gaaro, ka dibna ay u gudbiyaan guddiyada ay madaxda ka yihiin.

B. <u>Guddiga Dhaqaalaha</u>

29. Guddiga dhaqaaluhu wuxuu maamulayaa lacagaha xisbiga,

XISBIGA XAQ IYO CADAALO
RIGHT AND JUSTICE PARTY

dhaqaalaha soo gala iyo kharashiyaadka baxaya.

30. Wuxuu dhexdiisa yeelanayaa Gudoomiye, kuxigeen, xisaabiye, khasnaji iyo sadex xubnood oo u dhex ah.
31. Waxay maamulayaan akoomada xisbiga, waxaana akoomada lacag ka bixin kara Gudoomiyaha, xisaabiyaha iyo khasnajiga. Sadexdooda saxiix ayaa lacagtu ku bixi kartaa, waase lacagta cadaddeedu ka badan tahay 100 doolar, wixii ka yar waxaa bixin kara khasnajiga kaligiis.
32. Waxaa laga rabaa bil kasta xisaab xir ay ku cadahay lacagaha soo xerooday iyo siday ku baxeen. 4tii bilood hal mar ayeey hor fariisanayaan Guddiga isla-xisaabtanka iyo odhoda, iyaga oo u gudbinaya xisaab xirka dhaqaalaha xisbiga.
33. Hantida xisbiga waxay ku bixin karaan halka uu amro Gudoomiyaha xisbigu. Lacag uusan u saxiixin gudoomiyuhu ma bixin karaan.

34. Waa in ay isticmaalaan waraaqaha lacag qabashada/iyo lacag bixinta.
35. Dakhliga ay maamulayaan Guddiga dhaqaaluhu wuxuu ka imaanayaa lacagaha xubinimada ee xubnaha xisbiga laga ururiyo, deeqo ama sadaqaad xisbiga loogu deeqo.
36. Xisbiga waxaa xaaraan ka ah inay qabtaan lacag dawlad shisheeyey ama shakhsiyaad dano gaar ah leh ay qaab siyaasad ah u bixiyeen. Lama qaban karo wax lacag ah oo aan la aqoon ujeedada saxda ah ee loo bixiyey.
37. Lacagaha xisbiga waxaa ka xaaraan ah in lagu bixiyo meel aan loogu talo gelin sida laaluush.

C. <u>Guddiga isla-xisaabtanka iyo odhoda</u>

38. Guddigan shaqadiisa kowaad waxay tahay la xisaabtanka Guddiga dhaqaalaha iyo dhamaan guddiyada kale oo dhan. Wuxuu kala xisaabtamayaa arimaha dhaqaalaha iyo waxqabadka intaba.

4MMMM+A

39. Guddigani wuxuu awood u lee yahay inuu kala diri karo, markuu maro nidaamka gudoomiyaasha guddiyada iyo xubnaha guddiyada, waase markii uu kala tashado Guddiga shuruucda iyo xeer-dajinta.
40. Guddigani wuxuu dabagal ku samaynayaa oo la xisaabtamayaa guddiyada xisbiga oo dhan.
41. Guddigan waxaa loo gudbin karaa dacwadaha qaarkood, kuwaas oo ay ka mid noqon karaan dacwado ka dhan ah xubno denbiyo sameeyey ama u baahan in dabagal lagu sameeyo.

D. <u>Guddiga dhalinyarada iyo ururada bulshada</u>

42. Guddigan shaqadiisu waxay tahay arimaha dhalinyarada, wacyigelintooda, kusoo xiristooda xisbiga iyo dhamaan inuu u oleleeyo arimahan dhalinyarada.
43. Guddiga dhalinyaradu wuxuu ka dhex shaqaynayaa oo soo jiidayaa

XISBIGA XAQ IYO CADAALO
RIGHT AND JUSTICE PARTY

dhalinyarada ka shaqaysa ururada bulshada.

44. Guddiga dhalinyarada shaqooyinkooda ugu waaweyn waxaa ka mid ah inay dhinaca warbaahinta ka shaqeeyaan oo hadaf ka dhigtaan sidii xisbigu deegaanka ay dagan yihiin oo dhan u gaari lahaa.
45. Waxaa kaloo shaqadooda ka mid ah diyaarinta ajandayaasha xisbiga, qaban-qaabada shirarka, munaasabadaha, samaynta xayeesiisyada, daadahaynta shirarka, diiwaangelinta xubnaha cusub, kala wadida dhamaan hawlaha xafiiska.

E. <u>Guddiga wacyi-gelinta</u>

46. Guddiga wacyi-gelinta shaqadiisu waxay ay tahay inay xubnaha xisbiga mar kasta u sameeyaan wacyi-gelin, inay xubnaha caajisa dhiiri geliyaan, inay wanaaga faraan dhamaan xubnaha xisbiga, inay ka qayb qaataan hawlaha olalayaasha.

SBK XIZBIGA XAQ CADAALO RIGHT AND JUSTICE PARTY

47. Guddigan waxay isu shaqo dhowyihiin kan dhalinyarada, sidaas aawadeed waa in ay mar kasta iskaashadaan.
48. Waxaa kaloo shaqadooda ka mid ah raadinta dhaqaalaha xisbiga iyo inay dadka muhiimka ah mar kasta kala hadlaan himilooyinka xisbiga.
49. Waxaa Guddigan shaqadiisu tahay inuu xubnaha xisbiga kala saaro oo siiyo darajooyinka ay u qalmaan.
50. Marka uu xubin siinayo xubin buuxda wuxuu soojeedinta u gudbimayaa Guddiga maamulka, kaas oo kama damaysta ansaxinaya xubintaas xubinnimadeeda buuxda.

F. <u>Guddiga shuruucda iyo xeer-dejinta</u>

51. Guddigan shaqadiisa kowaad waxay tahay ilaalinta xeer-hoosaadyada xisbiga, iyo samaynta shuruuc cusub oo khuseeya xisbiga.
52. Xeerka marka ay diyaariyaan waxay horgeeynayaan shirka golaha, kaas oo marka uu ka doodo aqlabiyad ku ansaxinaya.

4MMMM+A

53. Waxaa kaloo shaqadooda ka mid ah inay xubnaha ku ilaaliyaan sharci dhawrista, siiyaana xubnaha digniino la xiriira jebinta sharciga.
54. Waxay sidoo kale eegayaan marka loo dhiibo galalka dacwaddaha xisbiga ee laga soo gudbiyo xubnaha xisbiga.
55. Waxay ka dib waafajinayaan dacwadda xeer-hoosaadyada xisbiga.

G. Guddiga hormarinta

56. Guddigan waxaa shaqadiisa kowaad tahay arimaha hormarinta ee xisbiga.
57. Wuxuu masuul ka yahay dhamaan fulinta mashaariicda xisbiga, kuwaas oo uu u xilsaaranayo guddiyo hoose, ka dibna korka ka maamulo fulintooda.
58. Waxaa kaloo Guddigan shaqadooda ka mid ah inay mashaariicda la isku waafaqo u raadiyaan dhaqaale, oo kala shaqeeyaan Guddiga wacyi-gelinta iyo Guddiga arimaha

4MMMM+A

dibadda iyo xiriirka caalamiga ah iyo Guddiga dhaqaalaha.

59. Guddigan waxaa shaqadoodu tahay inay sameeyaan oo soo qoondeeyaan mashaariicda hormarinta ee xisbiga.

H. <u>Guddiga warbaahinta iyo saxaafadda</u>

60. Guddiga warbaahinta iyo saxaafadda waxaa shaqadoodu tahay dhamaan arimaha ku shaqada le warbaahinta, waana Guddiga maamula saxaafada.
61. Gudoomiyaha Guddigani waa af-hayeenka xisbiga.
62. Xubnaha Guddigani waa in ay noqdaan dad codkar oo yaqaan hadalka.
63. Xubnaha Guddigani waa in ay noqdaan kuwo mar kasta soo ururiya dhamaan wixii xogo ah oo xisbiga khuseeya.
64. Waa guddi si joogto ah u sameeya baaritaano la xiriira arimaha siyaasada ee dalka iyo dibadiisaba.

4MMMM+A

65. Guddigani warbaahinaha qaarkood wuxuu la wadaagayaa oo baahinaya Gudoomiyaha guud ee xisbiga.
66. Dhamaan wax kasta oo ku shaqo leh warbaaxin iyo xogo-raadin Guddigan ayaa looga dambaynayaa.
67. Guddigana ayaa maamulaya oo bixinaya kharashka loogu talogalay warbaahinta.
68. Guddigani waa kan ku shaqada leh, arimaha sooshal meediyada.
69. Guddigan waxaa sidoo kale shaqadiisu tahay maamulida isla xiriirka xisbiga dhexdiisa ah.
70. Guddigan isaga ayeey shaqadiisa tahay, faafinta afkaaraha xisbiga.

I. <u>Guddiga arimaha dibadda iyo xiriirka caalamiga ah</u>

71. Guddigan waxaa shaqadiisa ugu weyni tahay arimaha qurba-joogta iyo siduu xisbiga ugu soo xiri lahaa.
72. Wuxuu ka shaqaynayaa magaaladiisa dadka dibadda ugu maqan inuu raadiyo

macluumaadkooda oo abuuro inay xiriir dhow la yeeshaa xisbiga.

73. Wuxuu ka raadinayaa dibadda dhaqaale.
74. Xubnaha Guddigani waa in ay noqdaan dhaamaantood dad ka yimid dalka dibaddiisa, hase ahaatee badankood dalka dib ugu soo noqday oo dagan.
75. Qaabka ay u shaqaynayaa wuxuu noqnayaa qaab online ah oo ay ka faa'ideysanayaan aaladda internetka.
76. Guddigani wuxuu si gaar ah ula shaqaynayaa, guddiyada ay ka midka yihiin, hormarinta, dhaqaalaha iyo maamulka.
77. Guddigani wuxuu ku dadaalayaa sidii xisbigu xafiisyo ugu yeelan lahaa dalalka dibadda.
78. Waxay kaloo shaqao joogto ah la samaynayaa, guddiyada dhigooda ah ee ka jira magaalooyinka kale.

XISBIGA XAQ IYO CADAALO
XAQ CAD
RIGHT AND JUSTICE PARTY

4MMMM+A

XEERKA 8AAD (Q1,Q2) (Q3a,b,c,d,e,f,g) (Q4), (Q5a,b, c), (Q6)

HANAANKA LOO DOORANAYO GUDOOMIYAHA IYO GUDDIYADA XISBIGA IYO CID KASTA OO SHAQO MASUULIYAD AH LOO IGMANAYO:

Ujeedada iyo haddafka xeerka 8aad

Nidaamka ama qaabka xisbigan qof loo doorto waa mid ka duwan xisbiyada kale oo dhan. Waa qaab Islaamka waafaqsan oo ku dhisan shuuro iyo magacaabis aan qofka la magacaabayaa ogeyn in loo xulayo in loo doorto masuuliyad shaqo xisbigu lee yahay ah, laakiin aan qofku isa soo mutuxayn oo in xil loo dhiibto isu soo qaawinayn. Dadka shaqada loo igmanayo guddiyo ayaa soo magacaabaya oo soo xulaya, ka dib ayaa xisbiga dhexdiisa la kala dooranayaa oo loo kala codaynayaa shakhsiyaadkii la soo xulay.

4MMMM+A

Marka nidaamka doorashada ee xisbigu waa xulasho (Selection) mana aha doorasho (Election). Waxaa jira qoraal kala sharaxaya labada eray ama labadan qaab. Waana arimo loo taba bari doono xubnaha buuxa ee xisbiga.

1. Talaabada ugu horaysa ee la qaadayaa waxay tahay in maalinta degmo ay ku dhawaaqayso xisbiga (26.09.2019 oo Khamiis ah) la doorto 5 xubnood oo ah guddi kumeel gaar ah, (Gudoomiye iyo kuxigeen + 3 xubnood), kuwaas oo shaqayn doona ugu badnaan mudo 3 bilood ah. Waxaa shaqadoodu ku eg tahay maalinta la helo tiro 70 qof ah oo xubno buuxa ah.
2. Markaas oo ay isugu yeerayaa xubnahaas, si loo qabto shir weynihii ugu horeeyey ee xisbiga, kaas oo lagu dooranayo gudoomiyihii, kuxigeenkiisi iyo 10kii guddi ee xisbiga.
3. Shantan xubnood ee kumeel gaarka ah waxay shaqadoodu tahay inay wadaan:
   a. Hawlaha diiwaangelinta

XISBIGA XAQ IYO CADAALADA
RIGHT AND JUSTICE PARTY

b. Habaynta ajandaha xisbiga
c. Shaacinta iyo ku tashkiilinta in dadku ay soo galaan xisbiga
d. Afhayeenka Guddigani waa gudoomiyaha kumeel gaarka ah
e. Waxaa laga rabaa inay qabtaan shaqo xoog leh oo ay dadka kusoo jiidayaan ka mid noqoshada xisbiga.
f. Xubnahaani waa in ay noqdaan kuwo aan marna ka caajisay hawlaha xisbiga, si aad ahna u dardar geliya in shir weynuhu degdeg u dhaco.
g. Waxay kaloo ka shaqaynayaa inay xubnaha buuxa hadba tirada ay ka helaan u qabtaan shirar joogto ah oo todobaad kasta dhaca. Shirarkaas todobaadlaha waxaa looga doodayaa ajandayaasha xisbiga, waxaa xubnaha loo carbinayaa inay bartaan qaabka xisbigu u shaqeeyo iyo xeer hoosaadyada xisbiga.

4. Ka dib marka shir weynaha (31.10.2019 oo Khamiis ah) la gaaro, waxaa xisbigu

4MMMM+A

yeelan doonaa oo la xuli doonaa guddiyo fulin oo isu-geynta tiradoodu ka kooban tahay 70 xubnood oo haysta darajada xisbiga ee xubin buuxda, waana inay yihiin kuwo xisbiga ka mid ahaa ama ku jiray ugu badnaan mudo 3 bilood ah. Xubnahaas oo ah kuwo mudadaas 3 bilood ah waday shaqo firfircoon oo aan hagrasho lahayn.

QAABKA DOORASHADA GUDOOMIYEYAASHU U DHACAYSO

5. 70ka xubnood ee ah xubnaha buuxa ee Golaha dhexe ayaa qabanaya doorashadii Gudoomiyaha iyo kuxigeenkiisa, taas oo u dhacaysa hanaankan soo socda:

a. Waxaa xubnaha loo kala saarayaa 10 qaybood oo midii tahay 7 xubnood, kuwaas ayaa markaas koox walbaa waxay gaarkooda uga munaaqashoonayaan halka qof oo ay is lee yihiin wuxuu ku haboon yahay Gudoomiyaha xisbiga degmada.

XAQ IYO CADAALO
RIGHT AND JUSTICE PARTY

4MMMM+A

b. Haddii ay isku waafaqi waayaan hal qof oo keenaan dhawr qof waxay ku kala saarayaan qaab codayn ah, waayo waxaa laga rabaa inay soo xulaan 1 qof kaliya.
c. Markay doortaan 10 xubnood oo musharixiin ah, ayaa waxaa loo qabanayaa inay doorasho cod bixin ah ku kala baxaan, taas oo qofka ugu cod bata uu noqonayo Gudoomiyihii xisbiga, kan ku xigaana noqonayo kuxigeenkii xisbiga, 8da soo hartaana waa gudoomiyeyaashii guddiyada.

6. 10ka xubnood iyagu doorashadoodu waxay u dhacaysaa codayn afka laga sheegayo, ismana dooran karaan, ee waa in uu qofku doorto gudoomiye iyo kuxigeen.

XISBIGA XAQ IYO CADAALO
XAQ CAD
RIGHT AND JUSTICE PARTY

XEERKA 9AAD (Q1-Q28)

XEER HOOSAADKA SHURUUDAHA XUBIN LAGU NOQDO IYO DARAJOOYINKOODA SIDA LAGU KALA SAARAYO:

Xubnaha xisbigu waxay kala lee yihiin afar darajo oo kala ah;

a. Xubin buuxda (A)
b. Xubin caadi ah (B)
c. Taageere buuxa (C)
d. Taageere caadi ah (D)

a. Xubin buuxda iyo sida lagu noqdo

1. Waa darajada xubin ahaan xisbiga ugu saraysa
2. Waxaa lagu gaari karaa darajadan mudo 7 cisho ah ilaa iyo hal sano
3. dadka loo qaadanayo waa in ay noqdaan dad aan horay dawladda ugu soo shaqayn, oo soo noqon siyaasiyiin

XISBIGA XAQ IYO CADAALO
RIGHT AND JUSTICE PARTY

4. Ujeedka arintan laga lee yahay wuxuu yahay in fursad la siiyo dadka cusub ee wanaaga lagu tuhmayo.
5. Guddi gaar ah ayaa aqoonsanaya qofka xubinta buuxda noqonaya ee buuxiyey shuruudaha lagu noqdo.
6. Xubnaha buuxa waa dadka kaliya oo loo ogol yahay inay xisbiga ka mid noqdaan guddiyadiisa fulinta iyo hogaanka xisbiga.
7. Xubinta buuxda lacagta xubinimada ee laga rabaa waa 10 doolar bishii (sanadkii 120 doolar). Lacagta xubinimada waxaa laga rabaa isla marka laga qabto foomka is diiwaangelinta. Waxay kaloo isku bixin karaan hal sano, waa hadii ay doonaan.
8. Waxaa xubinta buuxda laga rabaa inay noqoto xubin daacad ah oo si hagrasho

4MMMM+A

la'aan ah u shaqaysa, mar walbana leh firfircooni ay u heelan tahay in la gaaro himilooyinka xisbiga.

9. Waxay xisbiga dhexdiisa lee yihiin xuquuqo gaar ah iyo waajibaadyo gaar ah

Xuquuqaha gaarka ah ee Xubinta buuxda

10. Xubinta buuxda ee xisbigu waa tan kaliya oo xaq u leh inay xisbiga dhexdiisa cid doorato oo wax ka xusho ama iyada xil loo xulo.
11. Waxay xaq u lee dahay hadii ay safar ku tagto magaale kale oo xisbigu xafiis ku lee yahay in magaaladaas xubnaha xisbiga ee joogaa ay marti-geliyaan mudo 3 cisho ah, kharashka xubintana laga bixiyo khasnadda xisbiga ee magaaladaas.

XISBIGA XAQ IYO CADAALO
XAQ CAD
RIGHT AND JUSTICE PARTY

12. Waxay xaq u lee dahay inay magaaladaas qaab marti sharaf ahaana uga qayb geli karto shirarka socda, hase ahaatee cod iyo go'aan midna kuma laha.
13. Xubintani waxay xisbiga ku lee dahay talo soo jeedin, waxay xaq u leedahay inay wax ka gaarto go'aamada xisbiga.
14. Waxay kaloo xaq u lee dahay in hadii xisbigu cid shaqaalaynayo ay lahaato mudnaanta kowaad, dhamaan shaqooyinka mushaharka ah waxaa kaliya oo ka shaqayn kara dadka xisbiga ka haysta darajada xubinimada buuxda.

Waajibaadka gaarka ah ee saaraan Xubinta buuxda

4MMMM+A

15. Waxaa laga rabaa inay u gudato si hagar la'aan ah dhamaan hawlaha loo igmado.
16. Waxaa laga rabaa inay ku dhaqanto xeerasha xisbiga u yaal iyo mabaa'diida guud.
17. Waxaa laga rabaa inay mar kasta u taagnaato faafinta xisbiga iyo kusoo xirista xubno cusub. Ugu yaraan maalin kasta qadar hal saac ah waa in ay arimaha xisbiga kala hadasho dad cusub, ujeedkuna uu yahay inay xisbiga ku soo darto
18. Waxaa laga rabaa inay ilaaliso mar kasta sharafta xisbiga oo ku dhaqanto ahtaafta iyo qiyamka xisbiga
19. Waxaa laga rabaa inay munaasabadaha ka qaadato oo muujiso astaanka xisbiga

4MMMM+A

20. Dhamaan shirarka xisbigu waa muqadas ay tahay in laga soo wada qayb galo
21. Hadii xubintu ay imaan weydo sadex shir oo is daba joog ah, waxaa laga qaadayaa darajada xubinta buuxda, waxaana la siinayaa kaarka xubin caadi ah.
22. Sidoo kale hadii lagu arko dayacaad iyo hawlkarnimo la'aan waxaa u digaya Guddiga maamulka, hadii laba digniinood ka dib uu wax hagaajin waayo, waa laga qaadayaa darajada xubinta buuxda, waxaana laga dhigayaa xubin caadi ah, booskiisina qof kale ayaa galaya.
23. Xubin kasta oo xisbiga ka mid ah isma sharixi karto, mana dooni karto inay xil qabato, hadii la ogaado inay xubini ku jirto olale ah in la doorto, waa

laga saarayaa xisbiga gebi ahaanba, mana loo ogolaanyo mudo lix bilood ah inay xisbiga dib ugu soo noqoto.

24. Ka saaritaanka xisbigu ma aha arin fudud, marka xubin laga saarayo xisbigana waxaa la raacayaa hab-dhaqan iyo maraaxil u gaar ah, sida in la helo cadaymo iyo ugu yaraan laba markhaanti oo ku dhaarta in qofkani uu waday olale uu xil ku raadinayo.
25. Dhamaan xubnaha xisbigu waa in ay u arkaan in sharafka qofku ku jiro inuusan masuuliyad ku cararin. Qofkii si ogaal ah masuuliyad in loo igamado raadiyana xisbiga banaanka ayaa looga saarayaa.
26. Xubinta xisbiga laga saaro waxaa waajib ku ah inay soo celiso dhamaan hantida xisbiga, sida kaarka aqoonsiga, calamada iyo astaamaha

SBP XAQ IYO CADAALADA RIGHT AND JUSTICE PARTY

xisbiga. Guddiga ayaana eegaya wixii looga mag-dhabayo hantidaas, waana in loo celiyo kharashkii kaga baxay ugu yaraan kala bar.

27. Saraakiisha ciidamadu kama mid noqon qaraan xubnaha buuxa ee xisbiga
28. Hadii qofka ah xubinta buuxda ee xisbigu uu bixin waayo lacagta xubinnimada xisbiga mudo sadex biloowd ah oo isdaba joog ah, waa laga saarayaa xisbiga.
29. Haddii qofka xubinta buuxda xisbiga ka ah uu bixiyo xogo muihiim ah oo xisbiga ku saabsan, lana cadeeyo arintaas oo loo maro dariiqooyin ku cad X7aad/Q15, waxaa laga saarayaa xisbiga.



XEERKA 10AAD (Q1-4) (Q5a,b,c,d), (Q6-16), (17a-s) , (18-19)

XEER HOOSAADKA SHIRARKA IYO DOORASHOO-YINKA XISBIGA IYO XUBNUHU SIDA AY UGA QAYB QAADAN KARAAN:

Dhamaan shirarka xisbigu heerka ay doonaanba ha ahaadeene waxay lee yihiin adaabo iyo xeer-hoosaadyo la raacayo, kuwaas oo ay tahay in la fuliyo oo la dhawro, waxaana ku xiran arintaan jiritaanka iyo sii socoshada xisbiga. Ilaalinta aadaabta shirararka iyo xeer-hoosaadyadooda waxaa ku shaqo leh guddi ka kooban 3 gudoomiye.

Sida aan wada ognahay waxaa jira dad badan oo jecel nidaamka fawdada oo ujeedkay doonaanba ha la haadeene jecel sidii ay shirarka buuq uga abuuri lahaayeen oo u burburin lahaayeen. FG. Xeerarka hoos ku qoran waxaa ka mid ah denbiyo hadii uu qofku galo isla markaba ay noqonayso in laga saaro xisbiga.

XISBIGA XAQ IYO CADAALO
XAQ CAD
RIGHT AND JUSTICE PARTY

Qabashada shir

1. Xisbigu wuxuu lee yahay shirar jadwalkiisa ku cad oo ku aadadn xiliyada qaarkood, kuwaas oo ah kal fadhiyo caadi ah oo halka lagu astayn doono taariikhaha ay dhacayaan.
2. Shirka (1aad) ee ugu horeeya ee xisbigu wuxuu dhacayaa maalinta xisbiga deegaan ama degmo looga dhawaaqo, kaas oo wakhtigiisa ay tahay in horay loo cayimo.
3. Shirka (2aad) waxaa la qabanayaa marka ugu badnaan laga joogo 3 bilood ku dhawaaqista xisbiga ee deegaankaas.
4. Shirka (3aad) waxaa la qabanayaa marka ugu badnaan laga joogo 2 todobaad shirka 2aad.
5. Wixii sadexdaas shir ka dambeeyey xisbigu wuxuu

4MMMM+A

yeelanayaa shirar jadwalkooda la yaqaan oo noqon doona sida soo socota:

a. Shirka (1aad) ee xisbigu wuxuu ku aadan yahay Khamiista ugu dambaysa ee bisha Kowaad ama Janaayo ee sanad kasta, sanadka 2020 waxay ku aadan tahay oo shirku ka dhacayaa dhamaan xarumaha dalka 30/01/2020.
b. Shirka (2aad) ee xisbigu wuxuu dhacayaa Khamiista ugu dambaysa ee bisha Shanaad ama Meey oo ku aadan sanadka 28/05/2020.
c. Shirka (3aad) ee xisbigu wuxuu dhacayaa Khamiista ugu dambaysa ee bisha Sagaalaad ama Setembar oo ku aadan sanadka 24/09/2020.

4MMMM+A

d. Sadexdaas kal-fadhi ee waaweyn marka laga soo tago waxaa jiri doona shirar guddiyada xisbiga ah oo dhici doona Todobaad kasta maalinta Khamiista ah.

Aadaabta shirarka ama shuurada (Q6-16), (17a-s), (18-19)

6. Lama qaban karo shir aan lahayn ajande qoraal ah oo la soo mariyey Guddiga shuruucda iyo xeer-dajinta.
7. Shirarku waxay ku qabsoomaan inay fadhiyaan ugu yaraan tiro go'an oo ka mid ah Golaha dhexe ee xisbiga, tiradaas oo ah kala bar (35)+2=37 ugu yaraan.
8. Shirka waxaa looga hadli karaa oo kaliya ajandaha qoraanlka oo markaasi horyaal fadhiga shirka, kaas oo loo qorayo siduu

u kala horeeyo, loogana hadlayo siduu u kala horeeyo.

9. Shirka qof kasta oo ka hadlayaa waa inuu akhriyo hadal furashada Sunnada ah, taas oo ka kooban, Amaanta Allaah iyo weynayntiisa, Ku shugriga Allaah, Aayaadka Taqwada, Ku salinta Nabegi SCW.
10. Shirka laguma furi karo qof inta la soo kiciyo la dhaho akhri aayaad Quraan ah. Inta uu qabo qodobka 9aad ayaa ku furfurasho ugu filan, taas oo waajib ku ah qof kasta oo hadlaya.
11. Qofka shirka ka hadlaya oo doonaya inuu hadlo qadar aad u yar oo aan ka badnayn 1 daqiiqo, waxaa furfurasho u ah Alle ku shukri, iyo saliga, dabadeed isaga oo meeshiisa fadhiya oo aan kicin ayuu

RIGHT AND JUSTICE PARTY

hadlakiisa ku koobi karaa halkaas daqiiqo.

12. Hase ahaatee qofkii doonayo inuu hadlo qadar ka badan 1 daqiiqo, oo ilaa 2,3,4 ilaa 5 gaarsiisan waa in uu istaago, waxaana uu kala dooranayaa isaga oo meeshiisa taagan inuu hadlo ama waa in uu dadka hor yimaado. Furfurashada Sunnada ah ee ku xusan qodobka 9aad ayaa waajib ku ah.
13. Shirarka sinaba looma soo gelin karo arimo ay xasaasiyad ka dhalan karto, sida in cid la maago, la caytamo, cid la mucaarado, dawladdo la dhaleeceeyo ama wixii la mid ah.
14. Qofkii sameeya arimaha ku xusan qodobka 13aad, waxaa hadalka ka joojinaya Guddiga hoosaadka Anshaxa shirarka, haddii uu maqli waayana

4MMMM+A

waxaa shirka ka saaraya dhalinyarada qaabilsan amniga iyo kala damaynta shirka.

15. Qofka jabiya qodobkan 14aad waxaa laga mamnuucayaa inuu ugu yaraan ka maqnaado oo aan loo ogolaan 3 shir.
16. Shirka in qof afduubo oo hadalka ku noqnodo lama ogol. Qofkii sidaas sameeyana waxaa lagu qaadayaa qodobka 14aad.
17. Qaabka shirku u dhacayaa wuxuu yahay;
    a. Soo jeedinta aadaabta shuurada, (10 daqiiqo) (Xog-hayaha)
    b. Soo jeedinta ajandaha shirka (5 daqiiqo) (Karaaniga)
    c. Ka dib waxaa hadalka la siinayaa dadkii ku qoran ajandaha, kuwaas oo

4MMMM+A

hadli kara kaliya qadarta ugu qoran ajandaha

d. Shirarka khasab ma aha in gudoomiyu uu ka hadlo
e. Waxaa shirarka qaarkood daadahayn kara cid kale oo markaas ajandaha ku qoran, markaas oo gudoomiyuhu la mid yahay dadka dhagaystayaasha ah oo saaxada caadiga ah fadhiya
f. Marka loo gudbo wakhtiga ka munaaqashoodka ajandaha waxaa qofkii raba la siinayaa qadar uu ku hadlo oo hadalkiisa ku soo koobo
g. Khasab ma aha in cid kastaa ay hadasho, waxaase qofka shirka daadahaynayaa xaq u

XAQ IYO CADAALO RIGHT AND JUSTICE PARTY

lee yahay inuu dadka qaar ka codsado in aragtidooda la maqlo

h. Dadka shirka fadhiyaa ma kala fadila, sidaas aawadeed dhamaantood waa la dhagaysanayaa
i. Qofna fikirkiisa lama caaradi karo, loogumana qosli karo si ka jin ah, waxaa xaaraan ah in shirka ka dib qofka lagu dacaayadeeyo hadalo uu yiri
j. Dadku isku aragti maaha, waxaa laga yaabaa qof aad aragtidiisa quursanayso in uu kaa ra'yi fiican yahay, ee qofna ha xaqirin
k. Inaad hadasho waxaa ka fiican inaad dhagayste noqoto, hase ahaatee aragti wanaagsan oo

4MMMM+A

waxtar ah hadaad hayso ha la gaban

l. Ogow Ilaah ayaa yaqaan figradda tawfiiqdu ku jirto
m. Shirka ku fadhi niyad wanaag iyo in wax waxtar umadda u ah ka soo baxaan
n. Waxaad mar kasta niyadda ku haysaa, in waxa aad meesha u fadhidaa tahay dan guud oo aadan lahayn dan gaar ah
o. Shaydaanku wuxuu ku oranayaa hadal oo is muuji oo noqon kan kaliya oo loo bogo, marka waa in aad naftaada barto inaysan is muujin oo dadka hor boodin
p. Xisbigani ma qiimeeyo dadka jecel inay

XISBIGA XAQ IYO CADAALO
RIGHT AND JUSTICE PARTY

noqdaan muhiim ama ku raaxaysta sifo shakhsiyadeedka loo yaqaan "self-importance" muhiim baan ahay ee muhiim ha lii arko

q. Shirka dhexdiisa lama ogolo in qof aad loo weyneeye ama la amaano, xisbiga akhlaaqdiisa ka mid ma aha buunbuunintu.

r. Ku dadaal in shirka mar kasta laga gaaro guulihii loo qabtay

s. Ku tababar naftaan inaad ilaaliso is ixtiraanka, yeelatana sal-fadhi

18. Aadaabtan shuurada waxaa waajib ah in marka shirka la bilaabayo dadka loo akhriyo, sida uu qabo qodobka 17aad, xarafkiisa "a".

XISBIGA XAQ IYO XUMADA
XAQ
CADAALO
RIGHT AND JUSTICE PARTY

19. Waxaa sidoo kale haboon marka shirku dhamaado in la akhriyo Istiqfaarta mashruuca ah ee sunada ah ee fadhiga lagu xiro.



------DHAMAAD------

XISBIGA XAQ IYO CADAALO
XAQ
CAD
RIGHT AND JUSTIC E PARTY